## JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA

## WASAARADDA MAALIYADDA

# Mashruuca Kharashaadka Joogtada ah iyo Dib u Habaynta Maaliyadeed ee Saddexaad (RCRF III)

## Nidaamyada Maareynta Shaqaalaha

### Hordhac

Nidaamyada Maareynta Shaqada, waxay qeexayaan habka loo maareynayo shaqaalaha Mashruuca si waafaqsan shuruudaha sharciga qaranka iyo Heerarka Deegaanka iyo Bulshada ee Bangiga Adduunka iyo Qaab-dhismeedka Bulshada, waxayna la socdaan habka heerarka tayo ee bii'ada/deegaanka ee quseeya shaqaalaha kala duwan ee Mashruuca, oo ay ku jiraan shaqaalaha tooska ah, shaqaalaha qandaraaska haysta iyo shaqaalaha saadka ee aasaasiga, waxayna nidaamyadu bixinayaan faham cad, oo ku saabsan waxa loo baahan yahay si loo maareeyo arrimaha gaarka ah ee shaqada.

Nidaamyada Maareynta Shaqada, waxaa loo sameeyay si ay u caawiyaan ka fogaanshaha, yaraynta, iyo maaraynta khataraha iyo saameynta ee la xiriira shaqaalaha Mashruuca iyo in la hubiyo takoor la'aan, in fursadda loo siman yahay, ilaalin, daaweyn cadaalad ah, iyo xaalado shaqo oo badbaado iyo caafimaad leh.

**Dulmar guud oo ku saabsan Isticmaalka Shaqada ee Mashruuca:**

Heerka Labaad ee Tayo ee Deegaanka iyo Bulshada, wuxuu shaqaalaha u kala saaraa shaqaale toos ah, qandaraaslayaal, shaqaalaha bulshada, iyo shaqaalaha aasaasiga ee ka shaqeeya saadka.

**Shaqaalaha Tooska ah:**

Waa dadka sida tooska ah loogu qoray shaqada maalgelinta Amaahda (oo ay ku jiraan taageeraha Mashruuca iyo hay'adaha fulinaya Mashruuca) si ay siyaabo gaar ah uga shaqeeyaan Mashruuca. Kuwaas waxaa ka mid ah dadka ay shaqada u qoreen Wasaaradda Maaliyadda, Waxbarashada iyo Caafimaadka si ay u fuliyaan qaybaha Mashruuca oo ah 'la-taliyayaal farsamo'. Shaqaalaha tooska ah, waxaa looga baahnaan doonaa fulinta dhammaan shuruudaha Heerka Labaad ee Tayo ee Bii'ada/Deegaanka iyo Bulshada.

**Shaqaale Qandaraas Haysta:**

Dadka ay shaqaalaysiiyeen ama hawl galiyeen dhinac saddexaad si ay u qabtaan shaqada la xiriirta hawlaha muhiimka ah ee Mashruuca, iyada oo aan loo eegin goobta. Kuwaas waxaa ka mid ah: shaqaalaha hey'adaha qandaraaska la siiyay tusaale ahaan, shaqo wadaagga farsamo ee caafimaadka, in qandaraas lagu siiyo si ay u taageeraan hirgelinta qaybta Shaqaalaha Caafimaadka ee Dumarka ah iyo kuwa ay shaqaalaysiiyaan shaqo wadaagga hubinta ee madaxa-bannaan. Shaqaalaha qandaraaska lala galay, waxay laga rabaa in ay buuxiyaan dhammaan shuruudaha Heerka Labaad ee Tayo ee Bii'ada/Deegaanka iyo Bulshada.

**Shaqaalaha aasaasiga ah ee Qeybinta:**

Dadka ay shaqada u qaataan ama hawlgeliyeen alaab-qeybiyeyaasha waayweyn ee Amaahiyaha ( alaab-qeybiyeyaal si joogto ah u bixiya, si toos ahna u bixiya alaabada Mashruuca ama agabka lagama maarmaanka u ah hawlaha asaasiga ah ee Mashruuca. Kuwaas waxaa ku jiri kara alaab-qeybiyeyaasha daawooyinka muhiimka ah, saadka iyo qalabka looga baahan yahay xirmooyinka aasaasiga ah ee adeegyada caafimaadka iyo ka hortagga iyo xakameynta caabuqa, iyo sidoo kale sahayda kale ee socota ee Mashruuca. Alaab-qeybiyeyaashu, waa in ay muujiyaan in ay buuxiyaan shuruudaha ku saabsan shaqaaleysiinta carruurta, shaqada qasabka ah iyo walaacyo halis ah, oo la xiriira bad qabka.

**Shaqaalaha Rayidka ah:**

Meesha ay ka shaqaynayaan shaqaalaha rayidka ah ee dowladda, iyagoo xiriir la leh Mashruuca, ha ahaato shaqo dhamaystiran, ama shaqo aan dhamaystirneyn, oo waqtiyo gaar ah la shaqaynayo, waxaa qabanaya shuruudaha iyo waajibaadka, iyo xaaladaha heshiisyada ay

kula jiraan goobaha dowliga ah ee horay u shaqaalaysiiyay, haddii aysan jirin wareejin sharci ah, oo dhaqangashay oo shaqadooda ama howlaha loo igdmada la xiriirta ee Mashruuca.

Heerarka tayo ee Bii'ada/Deegaanka iyo Bulshada ee labaad ma khusayso shaqaalaha dowladda ee noocaas ah, marka laga reebo shuruudaha ilmaha iyo shaqada khasabka ah iyo shuruudaha Caafimaadka iyo Badbaadada Shaqada (oo ay ku jiraan amniga iyo Xadgudubka Ka-faa'iidaysiga Galmada ). Tani, waxay khusaysaa dhammaan shaqaalaha rayidka ah ee lagu maalgeliyay Mashruuca, oo ay ku jiraan macalimiinta, iyo sidoo kale haweenka shaqaalaha caafimaadka ah.

**Shaqaalaha Bulshada:**

Shaqaalaha bulshada, waa xubnaha bulshada ee shaqada loo siiyay si ay wax ugu soo kordhiyaan Mashruuca, ama u dhiirigeliyaan horumarka bulshadu ku tallaabsato, iwm. Mashruucu ma laha shaqaale bulsho sida lagu qeexay Heerka Labaad ee Tayo ee Deegaanka iyo Bulshada..

**Siyaasado iyo Habraacyo**

**Badqabka iyo Caafimaadka Shaqada:**

Iyadoo la raacayo qodobbada khuseeya Xeerka Shaqada Qaranka (Qodobada 101-104), Heerarka tayo ee Bii'ada/Deegaanka iyo Bulshada ee ay kujiraan Tilmaamaha Badbaadada Caafimaadka iyo Deegaanka, iyo dukumentiyada iibka tayada ah ee Banigaga Addunka, Wasaaradda kormeerka samaynaysa iyo sidoo kale Wasaaradaha Caafimaadka iyo Waxbarashada, ayaa maareyn doona Mashruuca si ay shaqaalaha iyo bulshada si sax ah looga ilaaliyo khataraha Caafimaadka iyo Badbaadada Shaqada ee suurtagalka ah.

Qodobbada ugu muhiimsan ee tallaabooyinka Caafimaadka iyo Badbaadada Shaqada, waxaa ka mid noqon doona (a) aqoonsiga khataraha ku imaan kara shaqaalaha; (b) qaadidda tallaabooyinka ka hortagga iyo ilaalinta; (c) tababaridda shaqaalaha iyo ilaalinta diiwaannada tababarka; (d) Qoridda iyo soo tabinta warbixinnada la xiriira shilalka iyo dhacdooyinka shaqada; (e) u diyaargarowga xaaladaha degdegga ah; iyo (f) la tacaalidda dhaawacyada shaqada iyo dhimashooyinka.

Tan, waxaa ku jiri doona nidaamka badbaadada iyo amniga iyo sidoo kale halista loogu jiro cudurrada faafa, oo ay ku jiraan Covid 19 iyo bixinta qalabka ilaalinta shaqsiyeed iyo qaadista tallaabooyin lagu joojinayo fiditaanka cudurada. Mashruucu, wuxuu hubin doonaa u hoggaansanaanta shuruudaha sharciga qaranka iyo sidoo kale tilmaamaha Bangiga Adduunka ee ku saabsan COVID-19.

**Shaqaaleynta Caruurta:**

Da'da ugu yar ee shaqaalaha shaqada loo dirsaday ee la xiriira Mashruuca waa 18 sano. Si looga hortago shaqaaleynta dadka aan da'adaasi gaarin, dhammaan qandaraasyada, waa in ay yeeshaan shuruudo shaqo bixin, oo loo hoggaansamo taasoo caddaynaysa da'ada ugu yar ee shaqa la siin karo, haddii loo hoggaansami waayana ay ka dhalanayso ciqaab. Dhammaan wasaaradaha shaqaalohooda ha ahaadaan shaqaale toos ah ama shaqaale aan toos aheyn iyo kuwa mushaarka uu siiyo Mashruuca, waxaa looga baahan yahay in ay joogteeyaan diiwaanka shaqada ee dhammaan shaqaalaha qandaraaska leh iyadoo da'adooda la xaqiijinayo.

**Muranka Shaqada ee Ku saabsan Shuruudaha iyo Awaamiirta Shaqada:**

Mashruucu, wuxuu yeelan doonaa habab cabasho, oo loogu talogalay shaqaalaha tooska ah iyo qandaraaslayaasha, waxaana looga baahan doonaa shaqaalaha qandaraaska qaatay in ay helaan habka cabashooyinka, waana in si degdeg ah wax looga qabto cabashooyinkooda goobta shaqada. Intaa waxaa dheer in mashruucu uu ixtiraami doono xuquuqda shaqaalaha Mashruuca ee ururada shaqaalaha iyo xoriyada ururka.

**Takoorka iyo Bannaan-u-Saaridda Kooxaha Nugul:**

Shaqaaleynta shaqaalaha Mashruuca, waxay ku salaysnaan doontaa mabda'a ah fursad loo siman yahay iyo hab-dhaqan caddaalad ah, mana jiri doonto takoor ku saleysan qaabab shakhsi ahaaneed, waxaana la tixgelinayaa dhinac kasta oo ka mid ah xiriirka shaqada, sida kuwa la xiriira shaqaalaynta, shuruudaha shaqada (ay ku jiraan mushaarka iyo faa'iidooyinka), joojinta iyo helitaanka tababarka. Mashruucu, waa in uu u hoggaansamaa Xeerka Shaqada Qaranka ee sinnaanta ragga iyo dumarka ee goobta shaqada, kaasoo ay ku jiraan bixinta fasaxa umusha iyo nasashada xannaanada ilmaha iyo helidda musqulo/suuliyo ku filan oo ku habboon, oo u gaar ah ragga iyo dumarka shaqeeya.

**Khatarta Amniga:**

Iyadoo la tixgelinayo khatarta amni, oo baaxad leh oo ka jira qeybo ka mid ah dalka, mashruucu, wuxuu soo saari doonaa hab-raac lagu hubinayo in la qaaday tallaabooyin amni, oo ku habboon si loo yareeyo khatarta ku imaan karta shaqaalaha rayidka ah ee uu lacagta siiyo Mashruuca iyo shaqaalaha tooska ah. Xiriiriyeyaasha, waxaa looga baahan doonaa in loo dejiyo habraacyo ammaan, oo loogu talogalay shaqaalahooda, waana in ay Waaxda Fulinta Mashaariicda ku wargeliyaan shilalka khatarta ah ee dhacay muddo 48 saac gudahood ah, haddii kale waxaa la baab'in karaa heshiiyadooda.

**Dhacdooyinka Tacaddiyada Ku-saleysan Jinsiga/ /ama Dhibaateynta:**

Marka la eego xaaladda hubid la'aanta ah, iska horimaadka iyo rabshadaha ka jira Soomaaliya, waxaa khatar weyn ah dhibaateynta jisniga/galmada, dhiig-miirashada ama si xun uga faa'iidaysiga iyo xadgudubka shaqaalaha la shaqeeya jawaab-bixiyeyaasha. Haddaba, dhammaan shaqaalaha Mashruuca iyo shaqaalaha rayidka ah ee dowladda waxaa looga baahan yahay in ay saxiixaan xeer-dhaqan qeexaya hab-dhaqan la isla og yahay, kana qaybgalaan kulamo wacyigelineed, oo joogto ah, oo ay ku jiraan kuwo lagu baranayo cawaaqibka ka dhalan kara falalka aan soo sheegnay.

Intaa waxaa dheer, shaqaalaha iyo goobaha Hababka Cabashooyinka, waxay heli doonaan tilmaamo ku saabsan maareynta cabashooyinka dhacdooyinka Tacaddiyada ku saleysan Jinsiga/ Xadgudubka Ka-faa'iidaysiga Galmada /Dhibaataynta, waxaana ka mid ah in aad looga taxaddaro loona xafido siraha dadka bad-baadayasha ah ama dhibaatadu soo gaartay, marka lasoo gudbinayo dacwad, ama qof dhibaato loo geystay loo fidinayo adeegyada la xiriira Tacaddiyada Ku-saleysan Jinsiga, iyadoo la raacayo rabitaanka badbaadaha ee kor u qaadista cabashada iyo u gudbinta badbaadaha adeegyada Tacaddiyada Ku-salaysan Jinsiga ee taageeraya.

**Dulmar Guud oo ku saabsan Sharciga Shaqada:**

**Awaamiirta iyo Shuruudaha**

Dastuurka Ku-meel-gaarka ah ee Jamhuuriyadda Federaalka ah ee Soomaaliya (oo la ansixiyay Agoosto 2012), wuxuu bixinayaa qaab-dhismeed sharciyeed oo la xiriira arrimaha shaqada. Xeerka shaqada ee Soomaaliya (Sharciga Lambarkiisu yahay 65, ee la ansixiyay 1972), waa sharciga gaarka ah ee shaqada ee xukuma ama hagaya dhammaan dhinacyada shaqada iyo xaaladaha shaqada, kaasoo ka kooban: qandaraasyada shaqada, shuruudaha iyo xukumada, gunnooyinka, caafimaadka iyo badbaadada shaqada, ururada shaqaalaha iyo maamullada shaqada. Xeerka Shaqaaluhu, wuxuu khuseeyaa dhammaan loo shaqeeyaha iyo shaqaalaha dhammaan goobaha Mashruuca, waana mid lagu dabbaqi karo dhammaan shaqaalaha.

Xeerka Shaqadu, wuxuu si ballaaran ula socdaa heerka labaad ee tayo ee Bii;ada/Deegaanka iyo Bulshada. Adeegga guud ama hay'adaha dowliga ah, waxaa maamula sharciga shaqaalaha rayidka ah (Xeer Lambar 11).

Dastuurka ku meel gaarka ah ee Soomaaliya, wuxuu dhigayaa in dhammaan shaqaalaha, gaar ahaan haweenka in ay xaq gaar ah u leeyihiin in laga ilaaliyo xadgudubyada galmada, kala soocidda iyo takoorka goobta shaqada. Sharci kasta iyo hab-dhaqan kasta, oo shaqada quseeya, waa in uu u hoggaansamaa sinnaanta jinsiga ee goobta shaqada.

Cabashada goobta shaqada ee caadiga ah, waa fursad shaqo oo cadaalad ah, oo loo siman yahay; waxaana ka mid ah, heerka mushaharka shaqada iyo dib u dhigista lacag bixinta; khilaafaadka xaaladaha shaqada; iyo welwelka caafimaadka iyo badbaadada ee deegaanka shaqada. Sidaa darteed, hab u gaar ah oo cabasho ah, ayaa loo samayn doonaa shaqaalaha Mashruuca (shaqaale toos ah iyo shaqaale qandaraaslayaal ahba), sida looga baahan yahay Heerarka labaad tayo ee Bi'ada/Deegaanka iyo Bulshada.

Shaqaalaha Mashruuca ee heer Dowlad Goboleed iyo heer Dowladda Federaal, waxaa lagu dhiirigelin doonaa in ay u soo gudbiyaan koormeerahooda tooska ah ama Iskuduwaha Mashruuca (Dowlad Goboleed) ama Maareeyaha Mashruuca. Si kastaba ha ahaatee haddii walaacu la xiriiro qodobbada Habka Maamulka Shaqada, waxay sidoo kale u soo gudbin karaan sarkaalka ilaalinta bulshada ee heer Dowladda Federaal, kaasoo u gudbin doona maareeyaha Mashruuca si loo xalliyo, iyadoo lala kaashanayo Guddiga Xallinta Cabashooyinka ee shaqaalaha, kaasoo ka koobma sarkaalka wax soo iibsiga, xoghayaha Mashruuca iyo khabiirka ilaalinta bulshada ama haddii uusan xallin Agaasimaha Guud ee Wasaaradda Maaliyadda**.**

**Hababka Cabashada ee Mashruuca kharasaadka Joogtada ah iyo Dib u Habaynta Maaliyadeed:**

Cabashada, waxaa lagu soo diri karaa cinwaannada email-lada soo socda:

1. FGS PIU GRM: rcrfgrm@gmail.com
2. FGS GBV SEAH: rcrfgenderunit@gmail.com
3. Southwest State: swssgrm@gmail.com
4. Jubbaland State: JL.RCRF.GRM@gmail.com
5. Hirshabelle State: Hssgrm@gmail.com
6. Puntland State: plrcrf.grm@gmail.com
7. Galmudug State: rcrf.grm.galmudug@gmail.com

Dhammaan cabashooyinka, waxaa loola dhaqmayaa si qarsoodi ah haddii la codsado ama baahi loo qabo in la ogaado. Wax aargoosi ah lama ogolaan doono in lagula kaco qof cabasho soo gudbiyay. Tacaddiyada Ku-salaysan Jinsiga/Xadgudubka Ka faa'iidaysiga Galmada iyo/ama Dhibaataynta, waxaa loola dhaqmayaa si waafaqsan rabitaanka cad ee qofka cabashada soo gudbiyay.

Cabashooyinka, waxaa wax ka qaban doona khabiirka arrimaha bulshada ee Dowladaha Xubnaha ka Federaalka iyo Maamulaha Mashruuca, (kaasoo ka koobnaan doona guddiga xallinta cabashooyinka haddii loo baahdo) ama loo gudbiyo khabiirka Dowladda Federaalka iyo Maamulaha Mashruuca. Haddii aan la helin xal lagu qanco, dadka cabashada qaba, waxay

cabashada  si toos ah ugu gudbin karaan xafiiska Bangiga Adduunka ee dalka:
**somalialert@worldbank.org**